Casharka 40

1. Markii Saa'uul addeeci waayey Ilaah, Kuma ayuu Ilaah u doortay inuu noqdo boqorka xiga ee Israa'iil?
-Daa'uud.

2. Maxay Daa'uud iyo Saa'uul ku kala duwanaayeen?
-Saa'uul ma rumaysnayn inuu dembi ku dhashay oo ay Ilaah kala dhaqaaqeen, laakiin Daa'uud wuu rumaysnaa.
-Saa'uul ma rumaysnayn in Ilaah dembiga oo dhan uu ku ciqaabo dhimasho, laakiin Daa'uud wuu rumaysnaa.
-Saa'uul ma rumaysnayn in Ilaah oo keliya uu awood u leeyahay inuu isaga badbaadiyo, laakiinse Daa'uud wuu rumaysnaa.

3. Kaddib markii  Daa'uud dhammeeyey dhismaha gurigiisa boqortooyo, muxuu doonayey inuu haddana sameeyo?
-Wuxuu Daa'uud doonayey inuu Ilaah guri u sameeyo.

4. Waa kuma kan ay ahayd inuu Ilaah guri u dhiso?
-Waa Wiilkii Daa'uud oo ahaa Sulaymaan.

5. Muxuu ahaa ballankii ugu weynaa ee Ilaah la dhigtay Daa'uud?
-Ilaah wuxuu ballanqaaday inuu Bdbaadiyaha ka soo dhex bixin doono faracii Daa'uud.

6. Maxay iskala mid ahaayeen macbudka Sulaymaan Ilaah u sameeyey iyo kii reer binu Israa'iil ay ka dhiseen cidlada?
-Macbudkii Sulaymaan dhisay iyo taambuuggii ay reer binu Israa'iil cidlada ku sidi jireen, waxay lahaayeen qoflka loogu yeero Meesha Qodduuska ah.
-Waxay kaloo lahaayeen qol labaad oo loogu yeeri jiray Qodduuska qoduusyada.



-Waxaa kaloo labaduba lahaayeen daah u dhexeeya qolka loo yaqaanno meesha qodduuska ah iyo kan loo yaqaanno qodduuska qodduusyada.

7. Maaddaama Ilaah uu qoddduus yahay wuxuu aad u neceb yahay dembiga, muxuu haddaba wadaadka sare samayn jiray markii uu soo galo Qodduuska qodduusyada?
-Wuxuu dhiigga xayawaanka ku sayrin jiray Sanduuqa Axdiga.

8. Maxaa Ilaah samayn doonaa marka uu arko dhiigga wadaadka sare uu ku rushaynayo Sanduuqa Axdiga dushiisa?
-Markii wadaadka sare uu sidaas yeelo, ayaa Ilaah wuxuu leeyahay sannad kale ayuu caradii ku dhici lahayd dadka dembigooda aawadood uu joojinayaa, waxaana taasu ay soconaysaa ilaa inta la helayo qurbaan dembi oo ka wanaagsan.

9. Maxaa haddaba dhiigga xayawaanka uu u bixin kari waayey dembiyada dadka?
-Waayo dembiga waxaa lagu bixin karaa oo keliya dhimashada dembiilaha.

10. Kaddib markii boqor Sulaymaan uu dhintay, maxaa reer binu Israa'iil ku dhacay?
-Reer binu Israa'iil waxay isku khilaafeen cidda noqonaysa boqorka xiga. Markaasaa 12kii qolo ay kala qaybsameen oo waxay noqdeen laba quruumood.

11. Maxaa loogu yeeri jiray tobankii qabiil ee woqooyiga degganaa?
-Israa'iil.

12. Maxaa loogu yeeri jiray 12kii qabiil ee koofurta degganaa?

-Reer Yahuudah.
-Waa maxay sababta Ilaah ula hadlay dadka?
-Waxay ahayd inay badbaadaan.

-Ilaah wuxuu kaloo u yeeray rag la hadla dadkiisa, si loo badbaadiyo uunka.

-Ilaah wuxuu kaloo farriintiisii uu u dhiibay Muuse, oo Muusena wuxuu la hadlay Fircoon iyo reer Masar si loo badbaadiyo.

-Waxaa kaloo Ilaah farriin u soo dhiibay Yashuuca, oo Yashuucana wuxuu la hadlay reer binu Israa'iil, si iyana ay u badbaadaan.

-Maalin, ayaa Ilaah u yeeray nin reer binu Israa'iil ah oo la oran jiray Yoonis.

-Ilaah wuxuu Yoonis ku amray inuu farriintiisa gaarsiiyo quruun dulli ah oo ku noolayd magaalada Nineweh.

-Dadkii magaalada Nineweh ku noolaa waxaa la oran jiray reer Ashuur.

Bal aynu akhrinno Yoonis 1:1-3a

1-Haddaba waxaa Yoonis ina Amitay u yimid eraygii Rabbiga oo sidan ku leh,
2-Kac, oo waxaad tagtaa magaaladaas weyn oo Nineweh, oo iyada ku qayli, waayo, sharkoodii wxuu yimid hortayda.
3-Laakiinse Yoonis wuxuu u kacay inuu Rabbiga hortiisa ka cararo oo xagga Tarshiish u baxsado.



-Maxaa Ilaah u doonayey in nebi Yoonis uu tago Nineweh?
-Waayo Ilaah wuxuu jeclaa dadkii reer Nineweh.

-Weliba wuxuu Ilaah doonayey inuu dadka reer Nineweh uu ka badbaadiyo awoodda dembiga, dhimashada iyo Shayddaanka.

-Maxaa Yoonis u cararay?
-Sababta Yoonis u cararay waxay ahayd inaanu doonaynin inuu tago magaalada Nineweh.

-Waa maxay sababta Yoonis aanu u doonaynin inuu tago magaalada Nineweh?

-Waxaa ugu wacnaa in dadka reer Nineweh ay ahaayeen dad shar badan.

-Waayo dadka reer Ninewewh waxay kaloo cadow ku ahaayeen reer binu Israa'iil.

-Waayo Yoonis ma aanu doonaynin in Ilaah badbaadiyo reer Nineweh.

-Haddaba miyaa Yoonis awooday inuu Ilaah ka cararo?

Bal aynu akhrinno Yoonis 1:3-10

3-Markaasuu Yaafaa u dhaadhacay oo wuxuu halkaas ka helay doonni Tarshiish tegaysa. Sidaas daraaddeed lacagtii nooliguu bixiyey, kolkaasuu gudaha galay, waayo, wuxuu doonayay inuu iyaga Tarshiish u raaco oo uu ka cararo Rabbiga hortiisa.
4-Laakiinse Rabbigu wuxuu baddii ku soo daayay dabayl

weyn, kolkaasaa waxaa baddii ka dhex kacay duufaan xoog leh, doonnidiina waxay ku dhowaatay inay burburto.

5-Markaasay raggii baxriyiinta ahaaaad u baqeen, oo mid waluba wuxuu u qayshaday Ilaahiisii. Alaabtii doonnida ku jirtayna badday ku dhex tuureen, si ay doonnidu iyaga ugu fududaato. Laakiinse wuxuu Yoonis mar hore u dhaadhacay doonnida meesha ugu hoosaysa, oo halkaasuu seexday, wuxuuna ku jiray hurdo weyn.

6-Haddaba waxaa isagii u yimid naakhuudihii doonnida, oo ku yidhi, Hurdahayow, maxaad u jeeddaa? Kac oo Ilaahaaga u qayli, waaba intaasoo uu inagu fikiraa inaannaanhaligmine.

7-Oo uxuu midba midkii kale ku yidhi, Kaalaya aynu saami ridannee si aan u ogaanno kan aawadii belaayadanu inoogu dhacday. Sidaas daraaddeed saami bay riteen, oo saamigiina wuxuu ku dhacay Yoonis.

8-Markaasay waxay isagii ku yidhaahdeen, Waannu ku baryaynaaye noo sheeg kan aawadiis belaayadanuinoogu dhacday. Waa maxay shuqulkaagu? Oo xaggee baad ka timid? Waddankaagu waa kee? Dadkaaguna waa ayo?

9-Oo isna wuxuu iyagii ku yidhi, Waxaan ahay Cibraani, oo waxaan ka cabsadaa Rabbiga ah Ilaaha samada, oo ah Kan abuuray badda iyo berrigaba.

10-Markaasay nimankii aad iyo aad u cabsadeen, oo ku yidhaahdeen, Waa maxay waxa aad samaysay? Waayo, waxay ogaadeen inuu Rabbiga hortiisa ka soo cararay, maxaa yeelay, isagaa u sheegay.

-Miyaa Yoonis awooday inuu Ilaah ka cararo?
-Maya.
-Miyaa Yoonis awooday inuu Ilaah iska qariyo?
-Maya.
-Miyaa Ilaah awooday inuu Ilaah ka baxsado?



-Maya.
-Ma jiro cid Ilaah ka baxsan karta.

-Weliba Shayddaanka iyo jinniyada ayaan Ilaah ka baxsan karin.

Bal aynu akhrinno Yoonis 1:11-17

11-Markaasay ku yidhaahdeen, Si baddu noogu degto aawadeed haddaba bal maxaannukugu samaynaa? Waayo, badda duufaankeedii aad iyo aad buu u sii weynaaday.

12-Oo isna wuxuu ku yidhi, Kor ii qaada oo badda igu dhex tuura, sidaasay baddu idiinku degi doontaaye, waayo, waxaan ogahay in duufaankan wynu daraadday idiinku soo kacay.

13-Habase yeeshee nimankii aad bay seeb doonnidii ugu wadeen oo ugu dadaaleen inay xeebtii ku soo noqdaan, laakiinse way kari waayeen, maxaa yeelay, badda duufaankeedii oo ka gees ahaa aad iyo aad buu u sii weynaaday.

14-Markaasay Rabbiga u qayshadeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Rabbiyow, waannu ku bayaynaa, oo waannu ku baryaynaaye, yaannaan u halligmin nolosha ninkan aawadeed, oo annaga ha na saarin dhiig aan xaq qabin, waayo, Rabbiyow, waxaad samaysay sidii aad ku faraxday.

15-Sidaas daraaddeed Yoonis bay kor u qaadeen oo waxay ku dhex tuureen baddii, kolkaasay baddii joojisay cadhadeedii.

16-Markaaway nimankii aad iyo aad Rabbiga ugu cabsadeen, oo waxay Rabbig u bixiyeen allabari, nidarrona way galeen.

17-Oo Rabbigu wuxuu Yoonis u diyaariyey kalluun weyn oo isaga liqa, Yoonisna wuxuu kalluunka calooshiisii ku dhex jiray saddex habeen iyo saddex maalmood.

-Maxaa Ilaah sameeyey markii Yoonis Ilaah addeeci waayey oo uu

aadi waayey Nineweh?

-Ilaah wuxuu soo diray kalluun weyn oo wuxuu liqay Yoonis.

-Imisa maalmood ayuu Yoonis ku dhex jiray caloosha kalluunkan weyn?

-Saddex habeen iyo saddex maalmood.

-Miyaa Yoonis awooday inuu ka soo boxo caloosha Nibiriga ama kalluunkan weyn?
-Maya.

-Waa kuma kan keliya ee awooday inuu Yoonis badbaadiyo?
-Ilaah.
-Maxay Yoonis iyo dadka kale oo dhan ay ka siman yihiin?

-Waxay ka siman yihiin inaanay iyaga un is-badbaadin karin. Dadka oo dhan iskama badbaadin karaan awoodda dembiga, dhimashada, iyo Shayddaanka.

-Isla sida Ilaah oo keliya uu nebi Yoonis u badbaadin karay, ayaa Ilaah awood u leeyahay inuu badbaadiyo dadka oo dhan.

-Maxaa Yoonis sameeyey intii uu ku dhex jiray caloosha Nibiriga?

Bal aynu akhrinno Yoonis 2:1

2-Markaasaa Yoonis Rabbigii Ilaahiisa ahaa baryay, isagoo ku dhex jira calooshii kalluunka.

-Yoonis wuxuu oggolaaday inuu Ilaah adeeci waayey.



-Yoonis wuxuu kaloo aqbalay inuu Ilaah ku dembaabay.

-Yoonis Ilaah buu u yeertay.

-Miyaa Ilaah badbaadiyey nebi Yoonis?

Bal aynu akhrinno Yoonis 2:10

10-Markaasuu Rabbigu kalluunkii amray, kalluunkiina wuxuu Yoonis ku mantagay berriga.

-Maxaa Ilaah sameeyey markii Yoonis qirtay inuu addeeci waayey oo uu ku xadgudbay Isaga Ilaahiisa ah?

-Waxaa Ilaah amray in nibirigu ku soo tufo Yoonis dhul engegan.

-Maxaa Ilaah u badbaadiyey Yoonis?

-Waayo Yoonis wuxuu qirtay inuu Ilaah addeeci-waayey.

-Waayo wuxuu kaloo qirtay Yoonis inuu Ilaah ku dembaabay.

-Kaddib mrkii Ilaah badbaadiyey Yoonis, miyaa Ilaah Yoonis u sheegay inaanu aadin Nineweh?
-Maya.

Bal aynu akhrinno Yoonis 3:1-2

1-Haddana mar labaad ayaa eraygii Rabbigu u yimid
Yoonis oo ku yidhi.
2-Kac, oo waxaad tagtaa magaaladaas weyn oo Nineweh,
oo waxaad iyada ku wacdidaa wacdiska aan kuu sheegayo.

-Ilaah isma beddelo.
-Ilaah weligiis isma beddelo.

-Ilaah weli wuxuu doonayaa in Yoonis uu u geeyo farriinta dadkiisa reer Ninewewh.

-Ilaah weli wuxuu doonayaa inuu badbaadiyo dadka reer Nineweh.

-Miyaa haddaba markan Yoonis uu addeecay Ilaah, oo uu tegay Nineweh?

Bal aynu akhrinno Yoonis 3:3-5 & 10

3-Sidaas daraaddeed Yoonis wuu kacay oo wuxuu tegey Nineweh siduu eraygii Rabbigu ku amray.  Haddaba Nineweh waxay ahayd magaalo aad iyo aad u weyn, oo waxay isu jirtay intii saddex maalmood loo socdo.
4-Markaasaa Yoonis wuxuu bilaabay inuu magaaladii dhex galo in maalin socod ah, oo intuu qayliyey ayuu yidhi, Weli waxaa u hadhay afartan maalmood, dabdeedna Ninewweh waa la afgembiyi doona.
5-Markaasaa dadkii Ninewewh Ilaah rumaysteen, oo waxay ku dhawaaqeen in la soomo, oo kii ugu wada weynaa ilaa kii ugu yaraa inta ka dhex leh waxay wada xidheen dhar jooniyad ah.
10-Oo markaasaa Ilaah wuxuu arkay shuqulkoodii iyo inay iyagu ka noqdeen jidkoodii xumaa, kolkaasaa Ilaah wuxuu ka noqday sharkii uu sheegay inuu iyaga ku samaynayo, oo taasna ma uu samayn.

-Markan Yoonis, wuxuu addeecay Ilaah oo wuxuu tegay Nineweh.

-Wuxuuna mrkan nebi Yoonis qaaday farriintii Ilaah ka timid,



wuxuuna gaarsiiyey reer Nineweh.

-Yoonis wuxuu dadka reer Nineweh u sheeay inay jidka sharka iyo dembiga leh isaga tagaan, si ay u raacaan dariiqa Rabbiga.

-Miyaa dadka reer Ninewewh ay maqleen farriinta Ilaah ee Yoonis u keenay?
-Haa.

-Ilaah wuxuu doonayaa inaad la mid noqotaan dadka reer Ninewewh.

-Ilaah wuxuu doonayaa inaad dhegaysataan farriintiisa sidii dadkii reer Ninewewh.

-Ilaah wuxuu kaloo doonayaa inaad rumaysataan Farriintiisa isla sidii dadkii reer Nineweh.

-Ilaah wuxuu doonayaa inaad waddada dembiga ka tagtaan, oo aad raacdaan waddadiisa.

-Ilaah wuxuu kaloo doortay dad badan si ay u noqdaan Farriin-walayaashiisa, iyo inay dadka u sheegaan farriimihiisa.

-Maxaa loogu yeeri jiray dadkii Ilaah u doortay inay farriin-walayaashiisa ahaadaan, si ay dadka ugu sheegaan Farriimihiisa.
-Nebiyo.

-Qaar ka mid ah nebiyada Ilaah ayaa waxaa loo diray tobankii qabiil ee reer binu Israa'iil ee degganaa daafaha woqooyi ee dhulka Israa'iil.

-Qaar kalena wuxuu u soo diray labada qabiil ee degganaa koofurta waxaana loo yiqiinnay reer Yahuudah.

-Maxaa haddaba nebiyadu ay u sheegeen dadka?

-Waxay u sheegeen inay jidka dembiga ka tagaan, oo raacaan dariiqa Ilaah.

-Waxaa kaloo nebiyadu ay dadka u sheegeen in Ilaah ka doonayo inay burburiyan asnaamtooda.

-Mid ka mid ah nebiyadii boqortooyada koofureed ayaa waxaa la oran jiray Ishacyaah.

-Nebi Ishacyaah.

-Nebi Ishacyaah wuxuu kaloo la hadlay dadkii degganaa woqooyiga Israa'iil, ee tobanka qabiil ahaa.

Bal aynu akhrinno Ishacyaah 10:6

6-Isagaan u diri doonaa inuu quruun cibaadalaawayaal ah ku kaco, oo waxaan ku amri doonaa amar ka gees ah dadka aan u cadhooday, inuu maalkooda dhaco, oo uu maxaabiis kexeeyo, oo uu iyaga ugu tunto sida dhoobada jidadka dhex taal.

-Maxaa haddaba ku dhacaya tobanka qabiil ee Israa'iil haddaanay dariiqyada dembiga ka tegin, oo ayan Rabbiga soo raacin?

-Ilaah wuxuu dhulka u soo dirayaa reer Ashuur si ay tobanka qabiil ula diriraan, oo dabeetana ay addoon ahaan ugu kaxaystaan dhulkooda.



-Waxaa kaloo jiray mid ka mid ahaa nebiyadii Ilaah oo la oran jiray Yeremyaah.

-Nebi Yeremyaah wuxuu wacdiyi jiray dadkii reer Yahuudah.

-Haddaba sidatan soo socota ayaa nebi Yeremyaah ku leeyahay dadkii reer binu Israa'iil ee koofurta iyo woqooyiga kala degganaa.

Bal aynu akhrinno Yeremyaah 20:5

5-Oo weliba magaaladan maalkeea oo dhan, iyo waxayaalihii ay ku hwshootay oodhan, iyo waxyaalaheeda qaaliga ah oo dhan, iyo khasnadaha boqorrada dalkaYahuudah oodhanba, waxaan u gacan gelin doonaa cadaawayaashooda, oo iyana way boobi doonaan, oointay kaxaystaan ayey Baabuloon wareejin doonaan.

-Maxaa haddaba ku dhacaya qabiillada reer Yahuudah haddayan ka tegin dariiqa dembiga, oo ayan raacin dariiqa Ilaah?

-Ilaah ayaa wuxuu iyana u soo diri doonaa reeer Baabuloon si ay u wiiqaan oo reer Yahuuda ugu kaxaystaan dalkooda, si ay addoommo ugu noqdaan.

-Ilaah isma beddelo oo weli waa sidiisii.

-Ilaah wuxuu doonayaaweli in dadka oo dhan ay isaga tagaan dariiqa demiga oo ay raacaan dariiqa Ilaah.

-Ilaah wuxuu dadka ku ciqaabayaa dhimashada daa'imka ah haddaanay dadku ka tegin dariiqa dembiga, oo ayan raacin dariiqa Ilaah.